



Home Links Xirriirinta Guriga Cutubka 4: Dunida Midabka: Toddobaadka 4

Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkan wuxuu ilmahaagu baran doonaa midabada. Isku day ugu yaraan saddex kamid ah hawlaha waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhtiga yar ee uu cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota.

XARAABEYSO!

Magaca Ilmaha: _____

Qorista/Akhrinta

Wada Akhriya:

Tani waa gabay ay tahay in ilmahaagu barto.

Three Little Monkeys

Three little monkeys swinging in a tree.
Along comes a crocodile as quiet as can be.
The first monkey says, "You can't catch me!"
SNAP!

Two little monkeys swinging in a tree.
Along comes a crocodile as quiet as can be.
The second monkey says, "You can't catch me!"
SNAP!

One little monkey swinging in a tree.
Along comes a crocodile as quiet as can be.
The third monkey says, "You can't catch me!"
SNAP!

"Missed me!"
- Qarsoodi

Luqadda

Isku Mid ah & Kala Duwan:

Soo uruuri walxo kala duwan sida malqacadaha, farageetad, saxanada yaryar, koobabka kala waaweyn, dhalooyinka caaga ah iyo dheriyada. Fiiri laba shay halkii marba oo kala hadal ilmahaaga wax ku saabsan waxa ay iyada ama isagu ogaado inay isaga mid yihiin iyo ay ku kala duwan yihiin.

Bilaabayaasha Wadahadalka:

- Maxay isaga mid yihiin ama ku kala duwan yihiin labadan shey?
- Waa maxay qaabkoogu?
- Waa maxay midabkoodu?
- Maxaa laga sameeyay?

Ereyada aad Isticmaali Kartid Intaad Wada Hadlaysaan Waxaa Kamid Ah: *isku mid, kala duwan, isku nooc, isku jaad, isbarbardhig, kala nooc, kala sooc.*

Hadal iyo Akhris Wadajir Ah (20 daqiiqadood)

Lagu Bilaawayaasha Wadahadalka:

- Waa maxay qeybta sheekada ka mid ah oo aad ugu jeceshahay?
- Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada?
- Maxaad u maleyneysaa in uu yahay waxa soo xiga oo dhici doona?

Xisaabta

U Tirinta Gaabab:

Kula tobabaro qaababka tirinta ilmahaaga adigoo isku beddelaya cod kor u qaadida iyo aamusida marka aad wada tirinaysaan. Tusaale ahaan, "1-2-3" (kor u akhri) "4-5-6" (aamus) "7-8-9" (kor u akhri) "10-11-12" (aamus), iyo wixii la mid ah.

Bilaabayaasha Wadahadalka:

- Maxaad ka ogaatay qaabkan?
- Maxay tahay qaab kale oo aan isku dayi karno?

Dhaqdhaqaaqa Weyn

Soo Bixida Laydhka Cagaarka ah/Casaanka ah

Waxaad tan ku ciyaari kartaa gudaha ama dibada waxaadna ku martiqaadi kartaa xubnaha kale ee qoyska. Si aad u ciyaarto, hal qof ayaa ah nalka taraafiga iyo kuwa kalena waxay istaagayaan laynka. Nalka taraafigu dhabarkiisu waxay eegayaan iyaga. Marka ay tiraahdo "laydh cagaaran," dadku waxay isku dayayaan inay gaadhaan laynka dhamaadka. Marka ay tiraahdo "laydh cas," waxay ujeedsanaysaa dhanka kale, dadkuna waa inay istaagaan. Tani waxay sii soconeysaa illaa iyo uu qof gaadho laynka dhamaadka kadibna dadku waxay beddeli karaan doorarka.

Buug-gelinta Akhrinta

Hubi maalin walba in adiga iyo ilmahaaga aad wada akhrisaan sheeko. Buugagta waxay noqon karaan kuwa ah af Ingiriisi ama luuqada gurigaaga. Booqo maktabadda dadweynaha xaafaddaada si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan midabada!

Isniin _____ Talaado _____ Arbaco _____ Khamiis _____ Jimco _____ Sabti _____ Axad _____

Buugaga aan ku akhrino dugsiga:

The Lion and the Little Red Bird
qorey Elisa Kleven

Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aadjeclaataan:

More, Fewer, Less qorey Tana Hobin
Of Colors and Things qorey Tana Hobin

Tallooyinka si Wadajir ah u Akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, "**Rescued** macnaheedu waa qof laga badbaadiyay khatar."
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, "Maxay dabada libaaxa isugu beddeshay midabyo kala duwan?"